XEERKA GOLAHA HOGGAAMINTA BEESHA HABAR GIDIR

Hordhac

Xeerka Golaha hogaaminta ee beesha Habargidir waa xeer maamul oo kooban ee loogu talo galay in golahani ku shaqeeyo, iyadoo shirweynaha koowaad ee shirka Nabadda Hobyo logu ansixiyo.

Waxaa la isla qaatay ku dhaqanka shareecada islaamka.

Xeerka waxaa si hal dheeri ah ugu codeynaya 250 ergo beelaha Habargidir ee madasha fadhiya.

Xeerkaan waxaa wax looga bedeli karaa oo kaliya goob shirweyne beeshu isugu timid isla markaasna uu goluhu gogosha dhigay. Mar kasta kooramka shirweynaha Beesha Habargidir waa 250 ergo.

I. Golaha

Waxaa loo unkay golaha hogaaminta in la mideeyo hogaanka iyo talada beesha, si loo yareeyo khasaaraha tartanka dhexdooda ah loona badiyo faa'iidada wax wada qabsiga.

Golaha hogaaminta waxaa loo unkay in uu ka shaqeeyo difaaca iyo horumarinta danta guud ee bulshada beesha Habargidr meel kasta oo ay ku nool yihiin.

Xubnaha golaha waxaa loo doortay in ay ka shaqeeyaan danta guud, ayna u hogaan. samaan mabaadi'da iyo xeerka golaha ee ay beeshu ku heshiisay.

Galahani xeer kama dhigan karo wax ka soo horjeeda shareecada islaamka.

Golaha Hogaamintu waa in uu kala shaqeeyo umadda Soomaaliyeed siddii loogu suurto-gelin lahaa dib-u-heshiisiin taam ah, dalka Soomaaliyeedna qaranimadiisa loo adkeen lahaa.

Golaha hogaamintu in uu hagaajiyo xariirka beesha Habargidir kala dhexeeya guud ahaan qabaa'ilka Soomaaliyeed gaar ahaan dariska iyo kuwa aan dan-wadaagta noqon karno.

II. <u>Dhismaha golaha</u>

a. Goluhu hogaamintu waxuu ka kooban yahay 56 oo ka kala wakiil ah shanta beelood ee Habargidir

b. Golahu waxuu dhexdiisa iska dooranayaa marka la ansixiyo: gudoomiye, gudoomiye ku xigeen, afar gudoomiye gudi hoosaad,

c. ku xigeenadooda,xoghaye iyo afayeen.

d. Golaha hogaamintu waxuu yeelanayaa Gudiga fulinta oo ka kooban 10 xubnood, gudiga dhaqanka 13, Gudiga siyaasadda 11, gudiga dhaqaalaha 11, gudiga caddalada iyo garsoorka 11.

e. Gudoomiyuhu waxuu yeelanayaa cod labaad marka codka xubnah codeeyey isla ekaadaan.

f. Gudiga fulintu waxuu ka koobanyahay : gudoomiyaha golaha, ku xigeenka Guddoomiye yaasha gudi hoosaadyada iyo ku xigeenadooda sida dhaqanka, dhaqaalaha, siyaasadda, caddalada iyo garsoorka.

g. Goluhu wuxuu wakiilo ku sameysan karaa meeshii loo baahdo, waxaana goluhu u sameynayaa xeer nidaamiye u gaar ah.

h. Mudada xil-heynta goluhu waa 3 sano, iyado xubintii xilkeeda si fiican u gudata marxaladda koobaad beeshiisu golaha u soo xulan karto hal mar oo kale.

i. Shirweenaha beeshu sanadkeeba mar ayuu ka dhacayaa xaruntiisa hadii aan sababa kale imaan.

j. Goluhu waxuu yeelanayaa miisaaniyad sanadeed qorsheysan waxaana bixinaya Xubnaha beesha Habargidir. Golaha hogaaminta ayaana xeer nidaamiyaha qaaraan aruurinta u gaara ku soo saaraya.

k. Golaha hogaaminta ayaa xeer nidaamiye u gaar ah ka soo saaraya xaquuqda xubnaha golaha.

l. Gudiyada : Fulinta, dhaqanka, siyaasadda, caddalada & garsoorka, iyo dhaqaalaha waxay sameysanayaan xeer maamul oo u gaar ah, kedib marka guddi kasta xeerka shaqo uu golaha u soo gudbiyo dood kedibna uu goluhu ansixiyo.

m. Xaquuqda xubnaha golaha waxaa lagu qeexayaa xeer-hoosaad u gaar ah kedib marka gudiga dhaqaaluhu ka soo talo-bixiyaan

n. Xarunta golaha hogaamintu waa degmada HOBYO, Galmudug.

III. Waajibaadka guddoomiyaha

1. Hagista shirarka rasmiga ah ee golaha .
2. Metalaadda Golaha shirarka masiiriga ah.
3. Hogaaminta wafuudda beesha shirarka caalamiga ah,haddii uusan qof kale u wakiilan.
4. Waa hogaamiyaha golaha iyo beeshaba guud ahaan.
5. Waxa uu leeyahay xushmad gaar ah waana maamuuska (proticolka) ugu sareeya beesha xitaa shirarka beesha dhexdeeda.

6. Awoodda joojinta shaqo kasta oo cusub oo uusan golaha amaba gudiga fulinta uusan amrin amaba dhaliil la taaban karo ay ka muuqato fulinteeda.

IV. Waajibaadka guddoomiye ku Xigeenka

i. Waxa uu yeelanayaa awoodaha gudoomiyaha golaha marka uu maqan yahay amaba uu wakiisho.

ii. Waxuu qabtaa shaqada guddoomiyaha, gudiga fulinta iyo golaha guud ay u wakiishaan.

V. Xil-waayista guddoomiyaha iyo ku-xigeenkiisa

a. Waxaa xilka ka qaadi kara 2/3 xubnaha golaha kedib marka gudiga garsoorku uu eedeyn rasmi ah oo wadata cadeymo shirka golaha guud uu keeno, ajendahana lagu daro si loogu codeeyo dood kedib.

b. Marka daruufo kale xilka u gudan waayo si cudurdaar la'aan ah.

c. Marka uu xilka iska casilo goluhuna ka aqbalo si rasmi ah.

VI. <u>Xilwaayista Xubnaha Golaha</u>

a. In Gudiga garsoorka iyo anshaxa uu ku soo eedeeyo ayna wehliyaan caddeyntooda.

b. Xilgudasho la'aan karti daro aawadeed.

c. Waxyeelaynta midnimada beesha.

d. Fulin la'aanta siyaasadda qorshayaasha golaha.

e. Cod hal-dheeri ah ayuu ku waynayaa xubinnimada

golaha waxaana xeer hoosaad u sameynaya gudiga fulinta kedibna golaha guud ka ansixinaya.

VII. Sharuudaha Xubnaha Golaha Fulinta

A. shaqsi bulshada dhexdeeda sharaf iyo karaamo ku leh, ku dhaqma diinta islaamka

B. waa in uu leeyahay 15 sano oo khibrad maamul ah.

C. waa in uu leeyahay shahaado jaamacadeed.

D. Da'da xubinnimada golaha waa ugu yaraan 35 sano

E. Horeyna aan xukun maxkamadeed ugu dhicin

F. Balwadna aan lahayn

VIII. Sharuudaha Xubnaha Golaha

A. shaqsi bulshada dhexdeeda sharaf iyo karaamo ku leh, ku dhaqma diinta islaamka

B. Leh khibrad shaqo oo aan ka yareyn 10 sano, gaar ahaan mid maamul

C. Da'da xubinnimada golaha waa ugu yaraan 35 sano

E. Leh aqoon jaamacadeed ama wax u dhigma

F. Horeyna aan xukun maxkamadeed ku dhicin

J. Balwadna aan lahayn

VIII. Waajibaadka Golaha

1. Golaha shaqadiisu waa in uu dejiyo siyaasadaaha horumarinta dhaqanka, siyaasadda, caddaalada iyo garsoorka iyo dhaqaalaha kedibna uu qorsheeyo fulinteeda si xirfadeysan.

2. Qabashada shirarka joogtada ah iyo kuwo aan joogtada aheyn.

3. Xal u raadinta siyaasadaha taban oo si toos ah iyo si dadbanba u saameyn karta beesha.

4. Golaha hogaaminta waa in uu taageera nidaamka dowlad wanaag cadaalad ku dhisan in guud ahaan dalka lagu soo dabaalo.

5. Go'aammada golaha waxaa lagu ansixnayaa cod hal-dheeri ah, kedib talo soo jeedinta gudihoosaadyada.

6. Shirka goluhu wuxuu ku qabsoomayaa tiro hal dheeri ah (50+1) tirada guud ee golaha

7. Goluhu xafiis shaqo fududeyn ah waa ka furan karaa meel kasta oo baahi loo qabo kedib marka qiimeyn sax ah lagu sameeyo lana hubiyo cidda loo wakiilanayo musuuliyaddaas iyo meesha laga keenayo dhaqaalaha ku baxaya xafiiskaas, si looga taxadaro in golaha sumcaddiisa si sahlan aan loo wiiqin.

8. Go'aanka golahu waa cod hal-dheeri ah, haddiise beelaha midkood ku cuslaato ama saluugto go'aankaas, waxaa lagu xallinayaa habka isqancinta.

9. Golahani waxa uu ka shaqeyn karaa danta guud ee beesha oo kaliya, kamana shaqeyn karo dano kooxeed, shaqsiyaad iyo mid shisheeye toona.

10. Gudiyada : Fulinta, dhaqanka, siyaasadda, caddalada & garsoorka, iyo dhaqaalaha waxay sameysanayaan xeer maamul oo u gaar ah, kedib marka guddi kasta xeerka shaqo uu golaha u soo gudbiyo dood kedibna uu goluhu ansixiyo.

11. Golaha hogaamintu wuxuu xaruntiisa ku shirayaa saddaxdii billoddba mar.

B. **Gudiga fulinta**

a. Gudiga fulinta ayaa leh ka go'aan gaarista wax kasta oo maareyn u baahan oo aan laheyn miisaan in shirarka rasmiga ee golaha la hor geeyo, isla markaasna aan ka mid aheyn wajibaadka guddi hoosaadyada golaha.

b. Guddiga Fulinta ee golaha ayaa leh kormeerka howl fulinta guddi hoosaadyaa golaha.

c. Guddiga fulinta ayaa leh awoodda qabashada shir aan caadi aheyn kedib soo-jeedinta gudoomiyaha golaha ama kusimaha gudoomiyaha.

d. Gudiyadu waxay shaqo kasta oo cusub la socodsiinaayaan kalana tashanayaan gudiga fulinta.

C. **Guddiga dhaqanka**

1. Metalaadda beesha shirarka dhaqanka.
2. Ka shaqeynta midnimada beesha.
3. Nabadeynta beesha dhexdeeda iyo beelaha kale.
4. Hagaajinta xirrika beesha iyo beelaha kale.
5. Ku shaqeynta go'aamada siyaasiga ah ee golaha.
6. Turxaan bixinta xeerarka dhaqanka ee beesha iyo ka ansixinta golaha.
7. Talosiinta golaha iyo gudiga fulinta gaar ahaan arrimaha dhaqanka.
8. Ka caawinta beelaha in ay sameystaan gudiyo dhaqan oo rasmi ah oo awood leh.

D. **Gudiga Siyaasadda:**

1. Daraaseynta iyo qiimeynta awoodda siyaasadeed ee beesha.
2. Horumarinta,wacyi-gelinta iyo tayeenta siyaasadda beesha.
3. Qabashada shirarka wacyi gelinta siyaasadda gudaha iyo dibadaba.
4. Ka talo-siinta arrimaha siyaasadda gudiga fulinta iyo golahaba.
5. Diyaarinta iyo ka ansixinta golaha qorshaha siyaasadeed ee sanad kasta .
6. Hagaajinta xiriirka wada shaqeynta qurba-joogta iyo golaha.
7. Kala shaqeynta guddiga dhaqanka hagaajinta xariirka beelaha kale.
8. Hagaajinta xariirka waddamada deriska iyo caalamkaba.
9. Curinta talo-siyaasadeed cusub iyo ka ansixinta golaha.
10. Qiimeynta iyo ka talo-siinta culeysyada siyaasaddeed ee beesha ka heysta deegaanada kala duwan ee dalka.
11. Fulinta go'aanada siyaasadeed ee golaha.

E. **Gudiga caddalada iyo garsoorka**

1. Soo diyaarinta qorshaha siyaasadda caddalada ee golaha.
2. Fulinta siyaasadda arrimaha caddalada ee golaha.
3. Qiimeynta iyo kala talinta guddiyada xaaladaha Caddaalo darada ee beesha dhexdeeda iyo beelaha kale, gaar ahaan kuwa si taban beesha u saameynaya.
4. Wacyi gelinta golaha siyaasadaha caddalada ee dalka iyo wax kasta oo xasilooni daro siyaasadeed u keeni kara beesha, degaankeeda iyo dalkaba.

5. Diyaarinta xeerarka garsoorka iyo anshaxa ee golaha.
6. Fulinta siyaasadda garsoorka iyo anshaxa.
7. Horumarinta xeerarka garsoorka ee beesha dhexdeeda.
8. Sameynta iyo caawinta gudiyada garsoorka ee beelaha dhexdooda.

F. **<u>Gudiga dhaqaalaha</u>**

1. Soo diyaarinta siyaasadda iyo qorshaha dhaqaale ee golaha.
2. Fulinta siyaadda iyo qorshaha dhaqaale ee golaha.
3. Qiimeynta awodda iyo culeysyada dhaqaale ee beesha heysta marxalad kasta.
4. Kala talinta golaha siyaasadaha dhaqaalaha ee dalka.
5. Ka wacyi-gelinta golaha siyaasadaha horumarinta dhaqaalaha.
6. Ka talo-siinta Golaha sida ilaha dhaqaalaha istaraatejiga ah loo abuuri karo.
7. La talinta ganacsatada beesha iyo hagaajinta xiriirka iyo isdifaaca dhexdooda ah.
8. Diyaarinta qorshe siyaasadeed dhaqaale oo lagu difaaci karo shirkadaha waaweyn iyo kuwa yaryar ee beesha.
9. Ka talo-bixin siyaasadaha maal-gashiga deegaanada beesha.
10. Goluhu waa in uu masuuliyad gaar ah iska saaraa siyaasadda horumarinta dekedaha iyo jidadka hal-bowlaha u noqon kara kaabayaasha dhaqaalaha ee deegaanada beeshu degto ga ar ahaan galmudug.

Dhamaad.